DEPARTMENT OF HEALTH

# Ma heli karaa tallaal bilaash ah ama qiima jaban?

## FOOMKA ISBAARIDA BUKAANKA EE UUAV

Barnaamijka (UUAV) wuxuu bixiyaa tallaal bilaash ah am qiima jaban, waxaana loogu tala galay dadka degan Minnesota oo da'dooda tahay 19-sano iyo wixii ka weyn oo aan haysan caymis caafimaad ama uusan wada dabooleyn caymiskooda.

## Waad u qalantaa barnaamijka UUAV haddii:

Aadan haysan caymis. Taas oo macnaheedu yahay inaadan haysan caymis caafimaad oo gaar ah ama uusan ku dabooleyn barnaamijyada caymiska ee Medicare ama Minnesota (MHCP) sida Caawinta Caafimaadka (MA) ama Minnesota Care.

## Waxaad xaq u leedahay UUAV si aad u doorato, tallaalada aan caymiska dabooleyn haddii:

- Aad haysatid caymis laakiin ma daboolayo tallaal gaar ah.
- Waxaad haysataa Medicare, laakiin siyaasadda caymiskaaga ma daboosho tallaal gaar ah.

Soo wac lambarka gadaal ooga qoran karakaaga caafimaadka si aad u ogaato haddii uu caymiska daboolayo tallaalka gaar ah.

## Uma qalantid UUAV hadii …

- Caymis gaar ah aad haysatid, ama lagaa jaro wax badan ama aad qeyb bixisid.
- Waxaad ku jirtaa MHCP sida MA ama MinnesotaCare.
- Waxaad ku jirtaa siyaasadda caymiska Medicare taas oo daboosha tallaal gaar ah, haddii xitaa lagaa jaro wax badan ama aad qeyb bixiso.

Waxaa kaliya oo aad xaq u leedahay tallaalada gaarka ah ee aanay siyaasaddaada Medicare daboolin. Wac lambarka ku yaal dhabarka dambe ee kaarka caymiska caafimaadka Medicare si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

## Halkaan ka eeg ilo dheeraad ah oo ad ka heli karto macluumaad:

- Uninsured and Underinsured Adult Vaccine (www.health.state.mn.us/people/immunize/hcp/uuav/index.html)
- Medicare Coverage of Immunizations (www.health.state.mn.us/people/immunize/hcp/uuav/medicareimm.html)

Minnesota Department of Health
P.O. Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-5522 or 1-800-657-3970
health.uuadultvax@state.mn.us

4/28/22 (Somali)

*Si aad xogtan ugu hesho qaab kale, wac: 651-201-4989.*